

Wadatashiga lala sameynayo dadka degan 159 Melrose waa ay furan yihiin


Dadka deggan Melrose Street ayaa lagu martiqaaday inay ka qeybqaataan xog-ururin kooban oo la sameynayo.

Kani ma aha foomka rasmiga ah ee uu qofku buuxinayo marka la rarayo. Waxay naga caawisaa uun in aan qorshayno baahiyaha bulshada inta lagu guda jiro howlaha dib-u-dejinta.


Waraaqa, iimaylo iyo fariimo qoraal ah ayaa la diray waxaana ku qornaa koodh/fariin gooni ah.

Booqo bogga internet ka ee xog-ururinta oo geli doona koodhka gaarka kuu ah ugu dambeyn **12pm, 27da bisha Maarso 2026.**

Dadka guryaha degan ee khadka online/internet ka uga qeybqaata xog-ururinta waxay haystaan fursad ay ku heli karaan abaalmarin ah **1 ka mid ah 10 foorjaro oo ay kiiba kujirto \$200** oo ay uga dukaameysan karaan Woolworths, BigW ama goobaha shidaalka ee EG Ampol.



Iskaan garee QR koodhka ama booqo homes.vic.gov.au/relocations-survey




Nagu xirnoow

- Kulamada la isku xog wareysanayo**
- Ra'yigii nalagula wadaagay kulamadii wadatashiga**
- Isdiiwaangeli si aad ula socoto wixii soo kordha**

Si aad wax kasta ula socoto booqo:

homes.vic.gov.au/north-melbourne-precinct



nagala soco baraha bulshada raadi **Homes Victoria**



DHISMAHA GURYAHA EE WEYN

Wixii ku soo cusboonaaday **Bulshada Waqooyiga (North) Melbourne**



Waxa ka socda goobta

Nagala soo qeybgal munaasbada ciida

Axad 29-ka bisha Maarso goobtuna waa Buncle Reserve

Dayactirka Sutton Street ayaa bilaabmaya

Shaqo culus ayaa waxaa laga bilaabi doonaa darbiyada dibadda ah, albaabada guryaha laga soo galo hortooda iyo meelaha dharka lagu dhaqdo

Wadatashiyada waxay u furan yihiin dadka degan 159 Melrose Street

Naga caawi inaan fahamno baahiyaha bulshada. Xog-ururinta waxay xirmaysaa 27-da bisha Maarso

Waxaan halkaan u joognaa dadka degan 159 Melrose Street

Wadatashiyada lala yeelanayo dadka guraya ayaa hada furan

Wixii la socda North Melbourne

Bisha Maarso 2026

33 Alfred Street

Dadka ayaa waqti xadirkan guuraya

Howlaha shaqo

- Sugidda iyo samaynta guryo bannaan oo ammaan ah
- Waxyaabo qayb ka ah guryaha laga guuray ayaa laga saarayaa
- Albaab amni oo la dhisayo kormeerkaa ugu dambeeyay ee korantada iyo waxyaabo yar oo la hagaajinayo
- Xoogaa buuq ah ayaa la filan karaa muddo kooban maalinta Khamiista ee ay taariikhdu tahay **12-ka bisha Maarso**

Ballamaha Xafiiska Guryaha ee Xaafadaada

Kooxda xafiiska guriyeynta ee xaafada waxaa hada laga heli karaa 12 Churchill Avenue, Ascot Vale.

Haddad rabtana waxaad la xiriiri kartaa kooxda North Melbourne:

- Sida caadiga ah u wac ama iimayl ugu dir howlwadeenkaaga guriyeynta
- Wac ama iimayl u dir si aad ballan ula sameysato howlwadeenkaaga guryaha ee North Melbourne
- Xilli kasta iska imoow xafiiska Ascot Vale

159 Melrose Street

Marxaladda xigta ee dib-u-dhiska

Waxaan halkaan u joognaa inaan dadka goobta degan, asxaabtooda iyo qoyskoodaba kala hadalno dib u dejinta la sameyn doono mustaqbalka. Meelaha boodhadhka lagu soo dhajiyo ka eeg wixii macluumaad ah ee ku saabsan maalmaha iyo xilliyada ay qabsomi doonaan kulamadu.

Agagaarka xaafada

- Qandaraaslayaasha iyo mas'uuliyiinta ayaa maalmo kala duwan booqanaya si ay goobta usoo kormeeraan uguna socod na kusoo maraan
- Hubinta isku xirka adeegga
- Sahmin dhulka ah oo lagu hubinayo amaanka mustaqbalka ee xuduudaha goobta

12 Sutton Street

Dib u dhiska mustaqbalka

- Howlo shaqo oo dayactir muhiim ah ayaa socda bisha Abriil 2026 ilaa bisha Diseembar 2026
- Shaqaaluhu waxay isticmaalayaan jaranjaro si ay u gaaraan meelaha kore ee darbiyada banaanka
- Shaqaalaha shaqada ka hayay qolalka hortooda, jaranjarooyinka, meelaha dharka lagu dhaqo laguna qalajisto

76 Canning Street

Dib u dhiska mustaqbalka

- Howlo shaqo oo dayactir muhiim ah ayaa socda bisha Oktoobar 2025 ilaa bisha Juun 2026
- Shaqaalaha shaqada haya ayaa waxay korayaan meelo si ay u gaaraan darbiyada banaanka
- Shaqaalaha shaqada ka hayay qolalka hortooda, jaranjarooyinka, meelaha dharka lagu dhaqo laguna qalajisto
- Meelo wax lagu gooyay ayaa jiri doona si loo sugo ammaanka

Nagala soo qeybgal Dabaaldega Ciidda!

In la asteeyo dhamaadka bisha Ramadaan (bisha soonka iyo is-xisaabinta) Ciiddu waa munaasabad farxadeed oo kulmisa qoysaska iyo asxaabta. Bulshada oo dhan waa la casuumay!

- **Axadda 29-ka bisha Maarso, 1-da ilaa 5-ta galabnimo goobtuna waa Buncle Street Reserve**
- **Waxaa goobta diyaar ku ah waxyaabo la fuulli karo, dukaamo, waxyaabaha isboortiga, wajiga oo rinji la marsado, cunto iyo madadaalo!**



Shaqadayada waxaa haga saacadaha shaqada ee golaha deegaankaaga:

Isniin ilaa Jimce

inta u dhaxaysa
7am iyo 7pm

Dadka goobta degan ee u baahan macluumaad dheeraad ah hala xidhiidhaan xafiiska guryaynta ee deegaankooda:

☎ **1300 360 462**

Sabti

inta u dhaxaysa 9-ka subaxnimo
iyo 3-da galabnimo

✉ **northmelbourne.housing@dffh.vic.gov.au**



Mararka qaarkood ogolaanshaha (permit) ay bixiyaan golaha deegaanka ayaa loo baahan yahay si looga shaqeeyo wax ka baxsan saacadahan laakiin dadka goobta degan waan la socod siin doonaa haddii ay tani dhacdo.



Dhammaan howlaha shaqooyinka waxaa lagu fulin doona heerarka ugu sarreeya ee badbaadada iyo shuruudaha sharciga.

Jadwalka shaqo ee howlaha dib-u-dhiska

33 Alfred Street, North Melbourne

Lama samaynayo dumin inta ay dadku wali degan yihiin dhismeyaal.

🕒 **2025**

1. Inaad wax badan ogaato oo ay waxkastana ammaan kuu ahaadaan

- Sugidda guryaha bannaan
- Kormeerista goobta iyo dhismayaasha si qalabka loogu maareeyo si amaan ah
- Joogtaynta dayactirka joogtada ah

🕒 **2026**

2. Diyaargarowga

- ✓ Diyaarinayo goobta iyo calaamadaha wax haga/tilmaamaya si loo sugo ammaanka goobta
- ✓ Hubinta isku xirka adeegga
- ✓ Dadka lugeynaya, baabuurta iyo baarkinada baabuurta oo amaan howlhooda ammaan laga dhigayo
- ✓ Howlo shaqo ayaa waxay ka socdaan gudaha dhismayaalka si amaana looga dhigo
- ✓ Waxyaabo yaryar oo guryaha ku dhagan ayaa laga fujin doonaa guryaha la faaruqiyay

🕒 **3. Duminta**

- Rakibaadda biraha wax lagu dhisayo (scaffolding)
- Dhismaha marka si taxadar leh oo tartiib-tartiib ah loo burburinayo
- Si joogto ah in bulshada loola socodsiiyo wixii soo cusboonaada



Wixii macluumaad dheeraad ah oo ay ku jiraan macluumaad ku qoran luqadaada booqo: **homes.vic.gov.au/information-in-your-language**

Wixii su'aalo guud ah iimayl u dir:

✉ **enquiries@homes.vic.gov.au**

